

FAAFINTA

RASMIGA

الرسمية



الجريدة

## DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA

لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 15-aad. Garowe July 22, 2013

Lam.07

Faafinta bil walba soo baxda

جريدة الشهرية

### Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

### TUSMADA

#### Qaybta Koowaad

#### Xeerka Ansixinta Gobol iyo Degmooyin

#### Qaybta labaad

#### Xeer


#### Waxba ma leh

#### Qeybta Saddexaad

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.

**Waxba ma leh**

*Sharci Lr 5 ee 22/07/2013, kuna saabsan Ansixin Gobol iyo Degmooyin*



PUNTLAND STATE OF SOMALIA

Sharci Lr.0 ee July 20, 2013, kuna saabsan Ansixin Gobol iyo  
Degmooyin.

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad  
XGGW/DPL/55/2013 ee 21/07/2013;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda Ansixintani u leedahay Dawladda Puntland;

**Wuxuu soo saaray**

Xeerka soo socda:

**Qodobka 1-aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Gobol iyo Degmooyin

**Qodobka 2-aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa  
Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee  
Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

**Qodobka 3-aad**

Dhaqangalka Xeerkani wuxuu noqonayaa maalinta  
Madaxweynuhu saxiixo, kadibna lagu soo saaro faafinta rasmiga  
ah ee Dawladda Puntland, kaas oo laga baahinayo idaacadaha,  
baahinta kadib ayaa xeerkani sharci noqonayaa, cid kastana ay  
waajib ku tahay inuu dhawro kuna dhaqmo xeerkan.

Dr. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud  
Madaxweynaha Dawladda Puntland

DAWLADDA PUNTLAND  
EE SOMALIYA  
GOLAHA WAKIILADA



ولاية بنت لاند الصومال

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha  
Office of the Speaker

Ref:- XGGW/DPL/ 55 /2013 Garoowe, Axad Date:-21/07/2013

Ku:- Madaxweynaha DPL Garoowe

Ujeeddo:- Ansixin Gobol iyo Degmooyin

**Guddoomiyaha Golaha Wakiilladdu:-**

- MARKUU ARKAY:- Dastuurka DPL Qodobkiisa 64-aad
- MARKUU ARKAY:- Soo gudbinta Madaxweynaha Ref MW/DPS/124/2013 ee April 14.2013kuna saabsan Ansixin Gobol iyo Degmooyin Cusub.
- MARKUU ARKAY: Soo gudbinta K/S Madaxweynaha Lr, 31 ee June 25/2013 kuna saabsan Magacaabid Degmada Bareyda.
- MARKUU TIXGELIYEY:- Baahida loo qabo Ansixinta Gobolka iyo Degmooyinka Cusub
- MARKUU DHEGAYSTAY:- Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada.

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

Ansixinta Gobolka Gardafuu iyo Degmooyinka

1. Ceelaayo & Buraan Gobolka Haylaan
2. Murcanyo & Bareyda Gobolka cusub ee Gardafuu
3. Towfiiq Gobolka Mudug

Allaa Mahad Leh

Cabdirashiid Maxamed Xirsi  
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL







PUNTLAND STATE OF SOMALIA  
THE PRESIDENT OFFICE

Ref: MW/DPS/124 /2013

Garowe جروي

April 14, 2013

Ku: Guddoomiyaha Golaha Wakiilladda ee Puntland Garowe

Ujeedo: Ansixin Gobol iyo Degmooyin Cusub.

Mudane Guddoomiye,

Anigoo tixraacaya go'aanka Golaha Xukuumadda ee 8/04/2013 ee uu ku go'aamiyey in la abuurdo Gobol cusub ee ka samaysmay deegaanka Bari ee Gobolka Bari, waxaana Gobolka loo baxshay **GUARDAFU** iyadoo loogu magacdaray Raasiga caanka ah ee badaha kala qaybsha, magaalo madaxda Gobolka waxaa loo go'aanshay inay noqoto magaalada taariikhiga ah ee **CALUULA**, sidoo kale waxaa goluhu ansixiyey 4 degmo oo cusub waxayna kala yihiin:

1. Degmooyinka **Ceelaayo** iyo **Buraan** oo ka tirsan Gobolka Haylaan
2. Degmada **Murcanyo** oo ka tirsan Gobolka Guardafu iyo
3. Degmada **Towfiiq** oo ka tirsan Gobolka Mudug

Haddaba, waxaan Guddiga Joogtada ee Golaha Wakiiladda Puntland ka codsanayaa inay ansixiyaan magacaabista Gobolka iyo Degmooyinka Cusub.

Wada shaqayn wacan

  
Dr. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud  
Madaxweynaha Dawladda Puntland

